

Talo bixinta La xariirta isku keenista qoysaska kala dhumay

## Macluumaadka Ilaalinta Xogta

### **Raadinta. Isku xirka. Isku keenista.**

Adeega Raadinta ee Ururka Laan qeyrta Cas ee Jarmalka (Adeegga Raadinta DRK) waxay caawisaa dadka qoysaskooda ka go'ay sababo la xariira rabshado hubeysan, masiibooyinka dabiiciga ah, baxsasho, barakac ama haajirid. Waxay dadka ka caawisaa raadinta xubnaha qoyska, si ay dib iskula xariiraan ama dib iskula midoobaan.

### **Waa maxay xogta muhiimka u ah shaqadeena?**

Si aan qofka oga caawino inuu dib ula midoobo xubnaha qoyskiisa, Adeegga Raadinta DRK waxay u baahan tahay macluumaad badan intii suurtagal ah. Tani waa dhamaan macluumaadka guud ee kore sida magacyada, Taariikhda qofku dhashay, xogta saxda ah, macluumaadka meelaha lagala xariiraayo qofka doonaya dib u midoobida. Xaaladaha qaar, macluumaad gaar ah oo laga helo qofka ayaa muhiim u noqon kara xaalada, tusaale, natijada baaritaanka aabaha si loo caddeeyo xariirka ama macluumaad ku saabsan xaalada caafimaad ee qofka ka tirsan qoyska gaar ahaan marka kiisku adag yahay.

Dhammaan macluumaadkaan waa xog shaqsiyadeed oo aan u baahanahay si aan oga shaqeenno danahaaga.

### **Waa maxay sababta aan ugu baahanay xogta?**

Adeegga Raadinta waxa uu isticmaalaa xogta shaqsiya si uu:

1. u raadiyo dadka maqan
2. u caddeeyo saxnaanta sheegashada
3. dib iskugu keeno qoysaska.

### **Xogta ma loogudbin doonaa qolyo saddexaad?**

Xogta shaqsiya waxaan ka dhignaa mid qorsoon. Maadaama ay qayb katahay shaqadeena, waxaa laga yabaa inay muhiim noqoto in xogta loo gudbiyo qolyo saddexaad, tusaale.

- isla Shabakada Adeega Raadinta (oo ka kooban Ururka Caalamiga ah ee Laan qeyrta Cas iyo Laan qeyrta Cas iyo Ururada Dhaqdhaqaaqa Cas ee wadamada kale)
- Laamaha Qaranka (tusaale, Laanta Socdaalka)
- Laamaha Arimaha Dibeda u qaabilsan Jarmalka (tusaale, Safaaradaha ama qunsuliyadaha)
- Ururada gargaarka ee maxaliga ah iyo kuwa dibeda

Arintaan waxay keeni kartaa caawimaad, tusaale, si loo helo macluumaadka ku saabsan xaalada fiisada ee hadda loona go'aamiyo taageerada lagama maarmaanka u ah kiiskaaga shaqsiyadeed. Xogta waxaa kaliya loo gudbin karaa qolyaha saddexaad haddii sidaasi lagama maarmaan u tahay in la fuliyo shaqooyinka adeegeena raadinta.

### **Waqti intee le'eg ayaan sii haynaynaa xogta?**

Xogta aad nagu aamintay waxaan sii haynaynaa illaa inta ay lagama maarmaan u tahay in lagu fuliyo arimaha kor aan kusoo xusnay sida ujeedada aan u aruurinay xogta.

### **Xeerarkee loo adeegsanayaa maareynta xogta?**

Qof kasta oo ay quseeyso waxaa uu xaq u leeyahay ilaalinta xogta. Shaqada Adeegga Raadinta DRK waxaa lagu maamulaa sharciyada adeega Raadinta DRK ee Xeerka Ilaalinta Xogta (DRK-SDDSG). Waxaa intaas sii dheer, waxaan raacnaa sharciyada Xeerka Ilaalinta Xogta Guud (DS-GVO) iyo Xeerka Ilaalinta Xogta ee Dawlada dhexe Jarmalka (BDSG) marka aan isticmaalayno xogtaada.

Haddii shaqadeenu lagama maarmaan u noqoto inaan xogtaada isku dhex weydaarsano isla gudaha Shakada Adeega Raadinta , laamaha qaybta ka ah ayaa raacaya xeerarka guud ee ilaalinta xogta si ay u isticmaalaan. Waxaan dooneynaa inaan hubino in xogtaada si hufan loo ilaaliyo, qaab kasta oo ay ku qaadato jaalayaasheena, haddii ay halkaan joogaan ama debida jiraanba.

**Waa maxay xaquuqahaaga ku aadan ilaalinta xogtaada shaqsiga ah?**

Waxaad xaq u leedahay inaad si bilaash ah u hesho xogtaada shaqsiyadeed ee aan hayno. Waxaa intaas dheer, waxaad xaq u leedahay inaad wax ka badesho xogta aan saxnayn ee aan hayno. Haddii aadan ku qanacsanayn keydinta macluumaadkaaga shaqsiyadeed, waad nasoo ogeysiin kartaa arintaas. Intaas kadib waxaan diyaarin doonaa sidaan ku tirtiri lahayn ama ku xanibi lahayd xogtaada.

Shaacin oggolaanshaha la siiyay Adeega Raadinta DRK waa laga noqon karaa gabi ahaanba ama waxaa laga noqon karaa qayb waqti kasta.

**Yaad la xariiri kartaa (Laanta masuulka ka ah)?**

Haddii aad wax su'aal ah ka qabtid isticmaalida xogtaada ama meel marinta xaquuqdaada ku aadan macluumaadka, dib u sixitaanka, baabi'inta ama joojinta, waxaad la xariiri kartaa xarunta Adeega Raadinta DRK ee aad kala xariirtay codsiga dib ula midoobida qoyskaaga.

Istaamka ama magaca, ciwaanka iyo taleefoon lambarka xarunta taageerada

Haddii aadan aqoon cida aad la xariirayso, waa caadi inaad lasoo xariirto xaafiiska guud ee Adeega Raadinta DRK:

Deutsches Rotes Kreuz  
Generalsekretariat  
Team 22/Suchdienst-Leitstelle  
Carstennstraße 58  
12205 Berlin  
Taleefoonka: +49 (0)30 / 8 54 04 -170  
Fakiska: +49 (0)30 / 8 54 04 -458  
limaylka: [suchdienst@drk.de](mailto:suchdienst@drk.de)

Madaxa Ilaalinta Xogta ee Adeega Raadinta, Ms. Frauke Weber, ayaa sidoo kale kuu diyaar ah si aad ula soo xariirto. Waxaad usoo diri kartaa iimayl adoo isticmaalaya: [datenschutz-suchdienst@drk.de](mailto:datenschutz-suchdienst@drk.de).